Ka Difaacidda Shaqaalaha Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada Hargab Xilliyeedka

Waa mahay hargab-xilliyeedka?

Hargab xilliyeed wuxuu dhacaa sannad walba, caadiyan qaboobaha. Dadku mararka qaar waxay ugu yeeraan qabow daran hargab xilliyeed, laakiin in la qaado hargabka wuu ka daran yahay qabow. Hargab xilliyeed cudur fida oo aad u daran uu sababo fayrus. Calaamadaha waxaa ka mid ah qandho, xanuun, madax xanuun, murqo xanuun, qufac iyo dhuun xanuun – iyo maadaama uu fayrus yahay, antibiyootiik ma caawinayaan. Tallaal ayaa la helayaa si looga difaaco dadka uu khatarta ku yahay.

Xitaa haddii dadku ay hargab xilliyeed qabeen ama laga tallaalay sannadkii hore, ma difaacna sannadkan maadaama fayrusku mar walba isbedelayo iyadoo tallaal cusub la soo saarayo sannad walba si uu ula falgalo kan cusub.

Kuwee khatar ugu sugan hargab xilliyeedka?

Qof walba ayaa qaadi kara hargabka laakiin wuxuu aad ugu daran yahay dadka da’da ah iyo dadka xaalada caafimaad qaba, gaar ahaan qaar cudurrada wadnaha ama neefsashada iyo kaadi-sonkorowga. Hargabku wuxuu keeni karaa dhibaatooyin sida boronkiito iyo sambab-xanuunka kuwaasoo u baahan kara daawayn cisbitaal iyadoo noqon karta dilaa dadka hore u xanuunsanaa.

Sababtee loo tallaalayaa shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada?

Shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada waxay khatar dheeraad ah ugu sugan yihiin faafidda cudurka, iyadoo tallaalku yaraynayo faafidda hargabka ee dhismayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada. Tani waxay ka caawinaysaa:

- difaacidda bukaanka nugul iyo isticmaalayaasha adeegga, ay ku jiraan kuwa hore u xanuunsanaa, qabi kara nidaam jir-difaacid hoosaysa ama aan kaga jawaabayn nidaam jir-difaacooda;
- difaacidda shaqaalaha kale ee caafimaadka iyo daryeelka; iyo
- xaqiijinta adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada inay yihiin kuwa shaqeeya oo muuqda iyadoo la yaraynayo maqnaanshaha shaqaalaha ee ka yimaada xanuunka hargabka.

Kumaa qaadanaya tallaalka?

Dhammaan shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee si toos ah uga shaqeeya daryeelka bukaanka ee:

- caawinta guud ay ku jirto caawinta ilkaha;
- cisbitaallada Hay’adda Caafimaadka Qaranka (NHS);
- cisbitaallada gaarka ah; iyo
- guryaha daryeelka degaan.

Tusaalayaal shaqaalaha sida tooska ugu hawlan daryeelka bukaanka:

- dhakhaatiirta, haweenka caawiyeyaalka ah iyo kalkaaliyeyaasha caafimaad;
- kalkaaliyeyaasha degdega iyo wadayaasha ambalaaska;
- dhakhaatiirta talo-siinta, jismi-daawaynta iyo raajooyinka;
- bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah sida GP-ga, ilkaha, kalkaaliye ilkaha, kalkaaliye caafimaad, kalkaaliye caafimaad degmo iyo booqdayaal caafimaad;
- shaqaalaha kalkaalinta iyo guryaha daryeelka ee xannaaneeya dadka da’da ah;
- shaqaalaha daryeelka bulsho ee ku hawlan daryeelka tooska ah ee bukaanka; iyo
- ardayda iyo tababarayaasha maadooyinkan iyo mutadawiciinta la shaqeeya bukaanka.

Kuma jiraan dadka aan sida tooska ah ugu hawlanayn ee waji ka waji daryeelka bukaanka. Hase yeeshee, kiisaska qaar, shao-bixiye wuxuu siin karaa tallaalka shaqaalahan.

Maxaa ku jira tallaalka hargabka?

Tallaalka hargabka waxaa ku jira la nooc oo fayruska xanuunka nooca A ah iyo hal nooc oo B ah. Tallaalku wuxuu difaacayaa kaliya hal sano sababtoo ah fayrusku si joogto ah ayuu isku badalayaa. Tallaal cusub ayaa soo baxa sannad walba si loo helo difaaca ugu fiican.

Tallaalku ammaan ma yahay?

Tallaalada hargab xilliyeed waxaa laga isticmaalaa guud ahaan caalamka wuxuuna leeyahay ammaan aad u fiican. Waxaa loo soo saaray inay la falgalaan fayrusyada la filayo inay soo galaan hawada qaboobaha.

Dadka qaar ayuu ku dhacaa kulayl yar iyo murqo xanuun maalmo dhawr ah kaddib tallaalka, iyadoo gacantooduna waxoogaa soo buuran karto halka laga tallaalay. Arrimo kale waa yar yihiin inay dhacaan iyadoo xirfadlayaasha caafimaad ee tallaalka bixinaya loo tababaray inay la tacaalaan.

Ma keeni karaa tallaalka hargabku hargab?

Maya. Tallaalka kuma jiraan fayrus nool, markaa ma keeni karaan hargab. Dadka qaar ayaa isku arki kara calaamado yar oo hargab u eg ilaa 48 saacadood maadaama qaabka jir-difaacoodu uu u jawaabayo tallaalka laakiin tani ma ahan hargab.

Goorma ayaa tallaalka hargabka la bixiyaa?

Hore markii ay dadku u sii qaataan tallaalkaba waxay sii horumarinayaan difaacid. Waxaa muhiim ah in tallaalka la sii qaato ka hor intuusan bilaaban faafidda hargabku sannad walba iyadoo tallaalku diyaar yahay bilowga Oktoobar. Dadka xaqa u leh tallaalka waa inay waydiistaan shaqo-bixiyahooda qaadashada daawada hargabka sida ugu dhaqso badan.

Sidee waxtar u yahay tallaalku?

Tallaalka hargabku waa mid waxtar leh laakiin waxaa jira noocyo kale duwan oo fayrus hargab ah iyadoo tallaalku difaacayo kaliya midka guud ahaan la yaqaan. Sidoo kale, tallaalku ma difaacayo qufaca iyo qabowga.

Fayrusyada kale waxay faafaan qaboobe kasta iyagoo sababa calaamado u eg hargabka haddana ma ahan kuwa u daran sida hargabka.

Dadka inta badan ee la tallaalo ma qaadaan hargabka. Hase yeeshee, sida tallaal kastaba, ma siinayso boqolkiiba 100 difaacid ah. Dadka 100 qof kasta ee la tallaalo, inta u dhaxaysa 70 iyo 80 ayaa difaacan iyadoo inta kalena ay qaadi karaan aclamado fudud.

Sidee tallaalku u shaqeeyaa?

Qiyaastii usbuuc ilaa 10 maalmood kaddib markii aad qaadato tallaalka jirkaagu wuxuu samaynayaa jir-difaacid tallaalka fayruuska ku ah. Jir-difaacayaashan waxay caawinayaan inay kaa difaacaan fayrusyada hargab ee u eg haddii aad la kulanto.

Difaaciddu waxay socotaa sannad.

Ma jiraa qof aan qaadanayn tallaalka hargabka?

Dadka inta badan waxay qaadan karaan tallaalka laakiin lama tallaalayo haddii ay qabeen:

- fal-celin xasaasiyadeed ah (fal-celin xasaasiyadeed aad u daran ah taasoo u baahan daawayn degdeg ah) ee hore u qabay; ama
- alerjiik daran ku ah ukunta digaaga.

Xirfadlayaasha caafimaadka ee tallaalka bixiya waxay ka jawaabi karaan wixii su’aalo ah.

Ma la siin karaa tallaalka dumarka uurka leh?

Haa. Tallaalka waxaa loo qiimeeyay inuu ammaan u yahay dumarka uurka leh. In kasta kuwa khatarta ugu jira, inta badan waxaa laga daynayo xilliga saddexda bilood ee ugu horreeya ee uurka. Xanuun hargab buuxa wuxuu khatar caafimaad ku noqon karaa uurka, sidaas darteed dumarka xaalad caafimaad qaba ee khatar daran ugu sugan hargabka waa inay weli qaataan tallaalka hargabka haddii ay uur leeyihiin.

Halkee ayay shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada ka heli karaan tallaalka?

Waa inay la xariiraan waaxda caafimaadka shaqooda wixii macluumaad dheeraad ah. Kuwa ka shaqeeya caafimaadka aasaasiga ah iyo daryeelka bulshada waa inay la xariiraan shaqo-bixiyehooda.

Xasuusin shaqo-bixiyeyaasha

Shaqo-bixiye kasta waxaa waajib ku ah daryeelidda bukaankooda/deganayaashooda jawi ammaan ah. Siinta shaqaalaha ku hawlan si toos ah daryeelka bukaanka tallaalka hargabka shaqo-bixiye wuxuu ka soo baxayaan mas'uuliyadooda. Sidoo kale, waxay ka hortagi kartaa ama yarayn kartaa cabashooyinka bukaanka/deganayaasha kuwaasoo kordhin kara culayska hantida shaqaalaha.

Shaqo-bixiyeyaashu waxay caawini karaan xaqiijinta helitaanka tallaalka si fudud. Tixgelin waa in la siiyaa raadreebka muhiimka ah halka ay shaqaaluhu ka diidayaan tallaalka.

Ka waran hargab doofaarka hadda socda?

Hargab doofaarku waa fayrus sidiisaba cusub kaasoo dad yar ay u haystaan qaab jir-difaacid. Wuxuu iman karaa waqti kasta oo sannadka ah, saamayn karaa dad ka tiro badan kuwa uu saameeyo hargab xilliyeedku, isagoo aad uga khatarsan. Tallaalka hargab xilliyeedku ma difaacayo hargab doofaarka.

Tallaalka hargab doofaarka waxaa marka hore la siinayaa dadka aadka ugu baahan. Macluumaad gaar ah ayaa la bixinayaa ku saabsan tallaalka iyo barnaamijka tallaalka.

Helitaanka macluumaad-sidaha

Macluumaad-sidahan laba-luuqadoodka ah waxaa mar kale laga heli karaa kaliya bogga internet-ka ee jir-difaacidda ee Xukuumadda Golaha Weelis (Welsh Assembly Government) ee:

www.wales.gov.uk/immunisation

iyadoo ku qoran luuqadaha soo socda:

Carabi	Lingala
Bengali	Polish
Bulgariyaan	Portuqiis
Shiinese	Punjabi
Czech	Russiyaan
Faarsi	Soomaali
Faransiis	Spanish
Gujarati	Swahili
Hindi	Tagalog
Kurdish (Sorani)	Urdu (Naskh)
Vietnamese	

Wixii ku saabsan macluumaad-sidahan waxaa lagu aadin karaa cinwaanka:

Qaybta Difaaca Caafimaadka - Health Protection Division
Welsh Assembly Government
Cathays Park
Cardiff CF10 3NQ

Teleefoon: 029 2082 5397 ama 029 2082 5410

© Crown Copyright September 2009
E318 0910